




Tilmaamaha isticmaalka (isticmaalka guriga)



Si taxadar leh u-akhri tilmaamtan oo dhan kahor isticmaalka VORTEX®

1



☉ Kahor isticmaal kasta, ka eego VORTEX® waxyeelo oo hubi inayna wax cad ahi ku hadhin.

2




☉ Ka fur furka buufimada / MDI (= cabbirka inta la neefsanayo).
☉ Si degdeg ah u rux buufimada. Eeg tilmaamaha la raacayo buufimadaada.

3




☉ Gali qayb afka buufimada fargalka xidhiidhinta ee VORTEX®.

4



☉ Dhig qaybta afka ilkaha dhexdooda kuna xidh dabnahaaga. Sidaa si ka duwan, dhig VORTEX® oo leh weji-gashi wejiga. Qaybta afka iyo sanko waa inay daboolan yihiin.

5



Isticmaal VORTEX® oo leh qaybta afka


☉ Ku bilaw daawada inaad soo jiido oo qaadato neef qoto dheer, oo deggan
☉ Neefka isugu qabo si koobkooban.
☉ Si deggan ugu neefso qaybta afka.

Hubi in halka kaliya ee soo jeedis lagu buufiyo VORTEX® wakhtigaas.

OGOW!

Carruurta kayar 18 bilood waa inay neefsadaan 4-6 jeer, carruurta ka wayn 18 bilood 2 ilaa 4 jeer waa inay neefsadaan. Haddii kale waxa suurogal ah in **daawayn aan kaafi ahayn** la siiyo karo. Dadka muddakarka ah, xiitaa hal neefsi ayaa ku fulan ku neefsiga daawada VORTEX®

6



Isticmaalka VORTEX® leh weji-gashiga

☉ Hubi weji-gashigu inuu ku adag yahay wejiga.
☉ Carruurta kayar 18 bilood, ku qabo weji-gashiga si adag wejiga ilmaha 4-6 neefsi, carruurta ka wayn 18 biloodna 2-4 neefsi.
☉ Dhallaanka ku neefsada weji-gashiga waxa lagu talinayaa inay bilaabaan buufinta inyar kahor galinta weji-gashiga wejiga ilmaha.

7



Haddii aad u baahato kabadan hal daawayn jiidis

Inyar sug, kadib ku celi tallaabooyinka 4 iyo 5 (ama 6) ee tilmaamaha.

VORTEX®

Tilmaan koban




Nadiifinta

Hubi inaad nadiifiso VORTEX®


- VORTEX® waa in la nadiifiyo gabi ahaan kahor isticmaalka koowaad.
- Haddii wasakh uu muuqdo VORTEX® waa in si dhakhso loo nadiifiyo. VORTEX® waxa loo nadiifin karaa sida soo socota (eeg Tasmada 8-13)




- Ka saar galka iyo weji-gashiga xidhiidhinta (haddii uu jiro). Ha ka saarin qaybta afka iyo furka dhawrista.



- Gabi ahaan ku nadiifi dhammaan qaybaha biyo qasabadeed diiran iyo dareeraha weelka lagu maydho.




- Ku biyo raaci dhammaan qaybaha biyo nadiif ah oo socda kadibna rux si aad uga saarto biyaha dheeraadka ah.



Jeermis dilista

- **Habka lagu taliyey**
Ee uumi-bixiye ama jeermis dile.



• **Si kale, waa biyo fayoy faxaya**

Dhig qaybaha kala gaar gaarka ah ee VORTEX® iyo aksasariska (tus., weji-gashiga) biyo faxaya ugu yaraan 5 daqiiqo. Isticmaal jalxad nadiif ah iyo biyaha la cabbi karo oo hubi inay biyo ku filan kujiraan jalxadda.



Qallajinta

- VORTEX® iyo walxaha la socda waa in si fiican loo qallajiyo. Astaamaheega aan degganayn derteed waxa sidoo kale lagu qallajin karo tuwal nadiif ah.

Distributör: Active Care Sverup AB

Uggledalsvägen 47 · 427 40 Billdal
Tel: 031-917525 · Fax: 031-917505
E-post: info@activecare.se
hemsida: www.activecare.se



PARI GmbH
Spezialisten für effektive Inhalation
Moosstraße 3 · D-82319 Starnberg

Specialister på effektiv inhalation

